# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية
# OFFICIAL BULLETIN
## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **Muqdisho, July 2024** **Lr.3**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**


## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

**SHARCI**

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## APRIL-JULY

# 2024

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 162** **Taariikh: 19/07/2024**

**XEER:** **QARAARKA MAMNUUCIDDA KA GANACSIGA HUBKA IYO SAANADDA CIIDANKA.**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
24 JUL 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad faqradaha (a), (b) iyo (e), Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka JFS iyo Qod 126aad ee Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Xeer Lr. 21 ee 26/08/1963 ee la xiriira Nabadgelyada Guud; iyo Xeer Madaxweyne ee lagu dhisay Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta ee Xeer Lr. 142 ee Tr. 08/10/2023;

**Markuu arkay:** Soojeedinta Wasaaradda Amniga Gudaha ee JFS;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024,** kuna saabsan Qaraarka **Mamnuucidda ka Ganacsiga Hubka iyo Saanadda Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu garowsaday:** Baahida loo qabo in la xoojiyo hannaanka maarreynta hubka iyo rasaasta iyada oo la xaqiijinayo Amniga Qaranka iyo u hoggaansanaanta halbeegyada caalamiga ah ee la xariira maareynta hubka iyo rasaasta;

**Waxa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad**
**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024,** kuna saabsan Qaraarka **Mamnuucidda ka Ganacsiga Hubka iyo Saanadda Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

## Mamnuucidda Ka Ganacsiga Hubka iyo Saanadda Ciidan

Waxaa la mamnuucay ka ganacsiga dhammaan noocyada kala duwan ee hubka iyo saanadda ciidan ee soo gelaya ama ka baxaya gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad

## Reebista Falalka Sharci-darrada ah

Waxaa reebban in la soo dejiyo, la dhoofiyo, la warshadeeyo, laga ganacsado, la isu gudbiyo, ama la daabulo hubka iyo saanadda ciidan.

## Qodobka 4aad

## Reebista Howlaha Dalaalnimada ee Hubka iyo Saanadda Ciidan

Waxaa la mamnuucay howlaha dallaalnimo oo la xiriira hub ama saanad ciidan oo laga fuliyo gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 5aad

## Heysashada Hubka iyo Saanadda Ciidan

Waxaa la oggol yahay haysashada hubka fudud sida Bistooladaha, AK47 iyo Qoryaha lamidka ah oo Cabirkoodu yahay 7.62mm (Calibre) ee ka diiwaangashan Wasaaradaha Amniga Gudaha ee labada heer dowladeed.

## Qodobka 6aad

## Tallaabooyin Sharci

1. Cid kasta oo jebisa qodobbada Qaraarka iyo shuruucda Dalka ee ku saabsan xakameynta hubka iyo saanadda ciidan waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan shuruucda Dalka, waxaana si sharciga waafaqsan lagula wareegayaa gaadiidka, hubka, iyo saanadda ciidan ee sharci-darrada ah.
2. Waxaa dabagal iyo xannibaad lagu soo rogayaa cid kasta oo lagu helo falalka sharci-darrada ah ee lagu mamnuucay Qaraarkan si waafaqsan shuruucda Dalka.

Qodobka 7aad

**Hirgelinta Qaraarka**

1. Wasaaradaha Amniga Gudaha ee labada heer dowladeed iyo hay'adahooda amniga gudaha waxaa la farayaa in ay fuliyaan Qaraarka iyo shuruucda Dalka ee khuseysa xakameynta hubka iyo saanadda ciidan.
2. Wasaaradaha Amniga Gudaha waxaa la farayaa inay si dhow ula shaqeyso Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta ee Xafiiska Amniga Qaranka si ay warbixin joogta ah usiiso Golaha Amniga Qaranka.

Qodobka 8aad

**Dhaqangalka Qaraarka**

Qaraarkan waxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-464-2024
TAARIIKH : 29/08/2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia